# Ogeysiinta Dadweynaha

# DIGNIINTA BIYAHA LA CABO

## TIJAABOOYINKU WAXAY MUUJINAYAAN HEERAR SARREEYA OO NITRATE AH

Magaca Nidaamka ______________________________________________________________________

**BIYAHA HA SIININA DHALLAANKA KA YAR 6 BILOOD AMA HA U ISTICMAALINA IN AAD KU DIYAARISAAN CAANAHA DHALLAANKA**



Muunadaha biyaha ee la soo ururiyey ________________, , ayaa waxay muujiyeen celcelis ahaan heerka nitrate-ka ee ________________ mg/L. kaas oo ka badan heerka ugu sarreeya ee US EPA (MCL) ee ah 10 milligaraam litirkiiba (mg/L). **Nitrate-ka ku jira biyaha la cabbo ayaa ah welwel caafimaad oo halis ku ah dhallaanka ka yar lix (6) bilood.**

Nitrate-ka ku jira biyaha la cabbo waxay ka iman kartaa ilo dabiici ah, warshadaha, ama ilaha beeraha (oo ay ku jiraan hababka septic-ga (haanta suuliga) iyo qulqulka ka soo baxa). Heerarka nitrate-ka ee biyaha la cabbo ku jiraa way kala duwanaan karaan sanadka oo dhan.

## Maxay tani ka dhigan tahay?

- **Ha siinina biyaha dhallaanka.** Dhallaanka da'doodu ka yar tahay lix bilood ee cabba biyaha ay ku jiraan Nitrate ka badan MCL ayaa aad u bukoon kara, haddii aan la daweynina, way dhiman karaan. Calaamadaha waxaa ka mid ah neefta oo qabanaysa iyo cilladda ilmaha buluuga noqda. cilladda ilmaha buluuga noqda waxaa lagu gartaa maqaarka oo buluug noqda.
- Calaamadaha dhallaanku si degdeg ah ayey u soo bixi karaan, iyadoo caafimaadku uu ka sii darayo muddo maalmo ah. Isla markiiba raadsada daryeel caafimaad haddii calaamado aad aragtaan.
- Isticmaala ilo kale oo biyo ah sida biyaha caagadaha si aad u diyaarisaan biyaha la cabbo, casiirka, caanaha ilmaha, iyo cabitaanada kale ee carruurta ka yar lix (6) bilood ilaa ogeysiis kale aad heshaan.
- **Haddii aad uur leedahay ama aad nuujinayso carruur da'doodu ka yar tahay 6 bilood, isticmaal ilo kale oo biyo ah sida biyaha caagadaha.** Haddii aad qabto walaacyo kale oo caafimaad oo gaar ah, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad la xiriirto dhakhtarkaaga.
- Dadka qaan-gaarka ah iyo carruurta ka weyn lix bilood waxay cabbi karaan biyaha tuubada.
- **Ha karkarinin biyaha.** Karkarinta, qaboojinta, shaandhaynta, ama u dhigistu biyaha kama dhimayso heerka nitrate-ka. Karkarintu waxay ka dhigi kartaa Nitrate-ku in uu sii bato oo xoogaysto sababtoo ah Nitrate-ku weli way sii joogayaan marka ay biyuhu uumi baxaan.

## Talaabooyinka aanu Qaadayno

Ilaa inta dhibaatada wasakhowga laga saxayo, biyo nadiif ah oo la cabbo ayaa lagu bixinayaa meesha soo socota:

______________________________________________________________________________

Intaa waxaa dheer, waxaan qaadeynaa tallaabooyinka soo socda si aan u hagaajino dhibaatada:

______________________________________________________________________________

Haddii aad wax su'aalo ah qabto, la soo xiriir: ____________________________________________

### Wixii macluumaad dheeraad ah

Waaxda Caafimaadka ee Minnesota
651-201-4700
health.noncommunitycompliance@state.mn.us

# Tilmaamaha Ogeysiiska Dadweynaha

## Goorma ayaan isticmaalaa ogeysiiskan?

- Ku soo dhaji Ogeysiiskan Dadweynaha 24 saacadood gudahood markaad hesho ogaysiinta natiijooyinka muunada biyaha kaas oo lagu ogaaday in heerarka nitrate-ka ku jira biyuhu ay ka sarreyso heerka ugu sarreeya ee US EPA (MCL) ee ah 10 milligaraam litirkiiba (mg/L).

## Sideen u isticmaalaa ogeysiiskan?

- Buuxi ogeysiiska adiga oo bixinaya macluumaadka soo socda:
  - Meesha laga heli karo biyo nadiif ah oo la cabbo;
  - Tallaabooyinka la qaadayo si loo saxo dhibaatada; iyo
  - Magaca iyo lambarka taleefanka qofka lagala xiriirayo nidaamka biyaha dadweynaha.
- Ku soo dhaji nuqullada Ogeysiiska Dadweynaha meelo muuqda ee dhammaan agagaarka nidaamka ilaha biyuhu u adeegaan.
  Dhismayaasha degaanka ahi waa inay ku dhejiyaan ogaysiis meelaha laga soo galayo oo waa inay ku wargaliyaan macaamiisha in biyaha caagadaha ee la cabbo loo hayo.
- Goobaha cuntada iyo cabitaanku waa inay ku soo dhejiyaan ogeysiis meelaha laga soo galo oo waa inay ku wargeliyaan macaamiisha in biyaha caagadaha loo isticmaalo diyaarinta cabitaannada.

## Muddo intee dhan ayaa la iiga baaahanyahay in uu ii dhajisnaado ogeysiisku?

- Ogeysiiska(yada) waa in ay meesha dhejisnaadaan ilaa baaritaanku ka xaqiijinayo in heerka nitrate ay ka hooseeyaan 10 mg/L.
- MDH ama hay'adda caafimaadka deegaankaaga ayaa kugu soo wargelin doonta marka ogeysiisyada aad fujin karto.

## Miyaa la iga rabaa in aan soo dhejiyo ogeysiiskan?

- Haa. Ogeysiinta dadweynaha ayaa looga baahan yahay jebinta heerarka biyaha la cabbo ee hoos yimaada sharciga Heerarka Sharciga Biyaha Cabbitaanka ee Badbaadada ah iyo Xeerarka Minnesota, cutubka 4720. Ku guuldareysiga in la soo dhajiyo Ogeysiiska Dadweynaha ayaa waxay nidaamka ka dhigaysaa in ay ku xadgudubeen xeerarkan.
- Fadlan ogow in ogeysiiskan uu ka kooban yahay macluumaadka loo baahanyahay. Haddii aad doorato inaad wax ka beddesho ogeysiiska, marka hore la tasho sarkaalkaaga u hoggaansanaanta ee MDH.

## MDH miyey iga rabtaa in aan soo ogeysiiyo in ogeysiiska la dhejiyay?

- Haa. Buuxi Foomka Xaqiijinta Ogeysiiska Dadweynaha oo ku soo celi MDH toban (10) maalmood gudahooda ka dib markaad soo dhejiso ogeysiiska. Ku guuldareysiga in la soo celiyo Foomka Ogeysiiska Dadweynaha ayaa waxay nidaamka ka dhigaysaa in ay ku xadgudubeen xeerarkan.

DEPARTMENT OF HEALTH

05/2022 Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, soo wac 651-201-4700.